

Halkee kale ayaan caawimo ka heli karaa?

Xafiisyada Adeegga Bulshada Qaar waxay leeyihiin dad u-dooda tacadiyadda guriga oo ka shaqeeya halkaas si ay idin caawiyaan. Dadkan waa khubaro waayo-aragnimo u leh tacadiyadda guriga waxayna kugu caawin karaa in aad ka fakarto dhammaan ikhtiyaaradaada, in aad qorsheyso ammaankaaga, iyo in ay kugu xiriiryaan khayraad kale oo kala duwan ee ka jira bulshadaada.

Si aad u hesho barnaamijka u-doodista tacadiyadda guriga ee ka jira degaankaaga, waxaad waci kartaa Khatka Tooska ah ee Tacadiyadda Guriga lacag la'aanta ah 1-800-799-7233.



DSHS 22-265 SM (Rev. 7/18)

U fur albaabka



ifaya **mustaqbal**
way rajo
fiican tahay
Caawimo loogu talagalay
dhibbaneyaasha tacadiyadda guriga

Miyuu qof ku waxyeelaynayaa adiga ama adiga ma Lagu waxyeeleeyay?

Adiga maka baqaysaa shiriigaaga, shiriigaaga hore ama xubin ka tirsan qoyska?

Waxaa jira dad kugu caawinaya in aad qorshayso ammaankaaga. Waxay kugu caawinayaan in aad hesho meel ammaan ah oo aad joogto, in aad u hesho la-talin iyo taageero sharci. Waxay sidoo kale kugu caawinayaan tallaabooyin kastoo kale ee lagu gaarayo madaxbannaani oo aad ku guuleysanayso.



Waxaan fahansanahay in dad badan ay la nool yihiin tacadiyadda guriga waxaanu gacan ka geysanaa in aanu ka dhigno qoysaska kuwa ammaan ah. Marka aad codsatid Gaargaarka Ku-meel-gaarka ah ee Qoysaska Baahan (TANF), waxaan ku wayddiinaynaa xoogaa su'aalo ah si loo arko haddii tacadiyadda guriga ay tahay arrin adiga iyo qoyskaagaba ay khuseyso.

FADLAN OGSOONOW: Waxaad go'aansan kartaa haddii aad noo sheegaysid in aad la kulantay ama haddii kale xadgudubka qoyska ama tacadiyadda. Waxaan nagala hadli kartaa tacadiyadda qoyska waqto kasta.

Waa maxay Tacadiyadda Qoyska?

Tacadiyadda qoyska waxaa loola jeedaa in shiriig ama xubin qoyska uu isticmaalayo habka kantarool iyo dabeecado xadgudub oo ka dhan ah shiriiga kale ama xubnaha qoyska. Dabeecadahan xadgudubka ah waxay noqon karaan kuwo la xiriira shucuur, galmo, jirka ama dhaqaalaha. Tusaalooyinka qaar waa:

- In uu si joogto ah kuu liido, kuugu yeero magacyo, ama uu ku ceebeeyo.
- Kaa ilaaliyo in aad la xiriirto qoyskaaga ama saaxiibadaada.
- Kantaroolidda in aad hesho lacag.

- In uu kuugu hanjabo in uu waxyeelo u geysto adiga, carruurtaada, xayawaanadaada rabaayadda ah ama waxyaabahaaga.
- In jir ahaan uu kuugu xadgudbo.
- In uu kuugu cadaadiyo arrimo la xiriira galmo.
- In uu ku dabagalo.
- In uu kaa hor-istaago in aad hesho ama aad sii-haysato shaqo.

Sideen Kuu Caawin Karnaa?

Haddii tacadiyadda guriga ay tahay arrin adiga ku khuseysa oo aadna ka walaacsan tahay in aad ka soo bixi waydo sharuudaha WorkFirst, la hadal shaqaalaha kiiskaaga ama shaqaalaha bulshada. Waxaa laga yaabaa in aan:

- Kaaga cudur-daarno shuruudaha shaqo-raadinta ama shaqada.
- Kaaga cudur-daarno qaadashada taageerada ilmo (ee loo yaqaano "sabab wanaagsan").

Haddii aan xulato in aad wax nooga sheegto tacadiyadda guriga waxaan ku dari karna hawlaha Qorshahaaga Mas'uuliyadda Shaqsi (IRP) si looga dhiga adiga iyo qoyskaaga kuwo ammaan ah, sida:

- Ka qaybgalidda kooxo la-talin iyo taageero.
- Raadsashada taageero sharci iyo u-doodis.
- Qorshaynta ammaanka.

Waxaan ognahay in tacadiyadda guriga ay farogelin karto awooddaada ah in aad maaliyad ahaan noqoto qof xassilan, waxaana doonaynaa in aan kuu caawino si kasta ee aanu awoodno.

Adiga iyo Qoyskaaga Muhiim Ayaad Inoo Tihiin

Waxaanu leenahay siyaasad aanu ku ilaalinayno macluumaadka aad noo sheegto. Haddii aad ka walaacsan tahay waxa ku dhacaya macluumaad kasta aad ina siiso, fadlan la hadal shaqaalaha kiiskaaga WorkFirst, shaqaalaha bulshada, ama u-doodaha tacadiyadda guriga ka hor inta aadan wadaagin macluumaadka xasaasiga ah.

Haddii aad noosheegto in carruur kasta lagu xadgudbo, waxaa la naga doonayaa in aan u sheegno macluumaadka Qaybta Carruurta iyo Adeegyada Qoyska (CPS) ama hay'adda sharci fulinta. (RCW 26.44.030(4))